# Muxuu ganacsiga sameeyn karaa si u caawiyo?

Te Korowai Whetū
Social Cohesion

## Social Cohesion Guide for Businesses

## Ka mid ahaanshaha ganacsiga

Ganacsiyada ayaa ka caawiyo dhisida social cohesion, oo ka caawiyo in dadka dareemaan sida inay ka mid yihiin, oo dareemaan ku daris, ay noqon karaan nafsadooda oo ay ka qeybqaataan bulshada. Ganacsiyada ayaa abuuro dhaqanka shaqo loo dhanyahay iyada oo la isticmaalayo hab dhaqamada shaqada. Waxay u suurtogelisaa dadka inay si buuxdo uga qeybqaataan bulshooyinkooda iyo dadka iyaga oo siinayo daqli shaqaalahooda oo ka dul qaadayo cadaadiska dhaqaalaha si ay "nolol maalmeedkooda u helaan". Cadeyn ayaa muujineyso in kala duwanaanshaha iyo in ka mid ahaanshaha inay leedahay faa'iido dhaqaale sida hal abuur kordho ee goobta shaqada.

Dhammaanteen waan kala duwannahay, laakiin waxaan rabnaa inaan isla socono, u dabaaldagno kala duwanaanshaheena oo aan ixtiraamno dadka kale markii aan qilaafno. Tani waa muhiim sababtoo ah ma ahan in qof walba uu dareemo inay noqon karaan cida ay yihiin ama aaminsanyihiin in codkooda la maqli doono.

Waxaan nahay wadan aad u kala duwan oo ganacsiyadeena ay u adeegayaan bulshooyin badan oo kala duwan. Waxaan u baahannahay inaan helno qaabab la isku dhageysto oo aan isku maqalno. Waxaan rabnaa inay naga go'naato inaan fahamno kala duwanaanshaheena iyo awoodaheena oo aan ka shaqeyno waxa na mideeya iyo waxa isku keyn soo dhaweeyo.

## Ka mid ahaanshaha

# – waxa ay u egtahay

Bulsho ay dadka si fiican isku fahmaan, waan is naqaanaa, ogaano dariskeena, dareeno goob shaqo loo dhanyahay, oo carruurteena dareemaan inay ka qeyb yihiin bulshooyinkeena oo ogow inaan naqaano meesha loo aado caawin markii aan u baahannahay. Waxaan dareenaa inay noo suurtogaleyso inaan la hadalno dadka aan caadi ahaan ula hadlin, aan ka hadalno markii aan maqalno dad dhahayo waxyaabo takoorid ah, oo aan xor u nahay inaan la wadaagno cida aan nahay, halka aan ka nimid, iyo sida aan waxyaabaha u sameeyno. Markii ay dhibaato jirto qofna gadaal ugama tagno – oo qof walbaa lagu daro.

## Dhisida ka mid ahaansho badan (Kordhinta ka mid ahaanshaha)

# – waxa aad sameeyn kartid

**Marka, maxaan ku sameeyn karnaa ganacsiyada si ay u caawiyaan shaqaalaha, macaamiisha iyo rukunada inay ka mid yihiin, qaataan kala duwanaanshaha, ka qeybqaataan, aaminaan dadka kale, dareemaan ku xirnaansho iy ixtiraam?**

### Ka mid ahaanshaha, aaminaada dadka kale

- tixgeli sida looga dhigo shaqooyinka kuwa ay heli karaan kooxyada kala duwan.
  - ku xayeysii shaqooyinka dhinaca shabakadaha bulshada, ururada, saldhigyada raadiyowga, tabinada cidaacadaha, boggaga warbaahinta bulshada, wargeysyo badan kala duwan oo warbaahinta iyo kanaalada telefishanka oo dhageystayaasha gaarka ah
- tixgeli helitaanka adeegyada iyo alaabaha la bixiyay.
  - haddii ganacsigaaga lagu sameeyo onleenka, miyay heli karaan dadka aragga curyaanka ah? Haddii ganacsigaaga uu leeyahay dukaan ama xafiis wajahayo dadweynaha, miyay heli karaan dadka leh curyaannimada dhaqaaqa?

## Qaadashada kala duwanaanshaha, dareemida ixtiraam

- qiimee kala duwanaanshaha shaqaalaha oo aasaas barnaamijyada lagu taageerayo kala duwanaanshaha.
  - aqoonso dabaaldagyada iyo munasabadaha muhiimka u ah shaqaalaha, ku dhiirogeli iyaga inay la imaadaan iyagoo dhan shaqada, oo sii fursadaha ay tallo kaga dhiibtaan adeega iyo naqshadeynta alaabaha

## ku taageer shaqaalaha inay isbartaan (whakawhanaungatanga).

  - u daji waqti ka baxsan maalinta ama isbuuca isula imaadaan sida koox ama asxaab si ay usu bartaan. Tan ayaa noqon karto shaaha subixii ama galabkii, ama qeyb ka mid ah ganacsiga ee ka baxsan maalinta
- sare u qaadi hab dhaqamada ugu wanaagsan iyada oo loo marayo abaalmarinada heerka sare ee ganacsiga sannadlaha, meeshaas oo tabarucaadaha kala duwan waa la qiimeeyay, iyo meelaha shaqada loo dhanyahay waa lagu dabaaldagaa.

## Dareemida ku xirnaanta

- raadi oo sare u qaad wadahadalka bulshooyinka ee laga yaabo inay wadaagto aragtiyo kala duwan ee aad ku kobcisid fahamka.
- isticmaal kooxyada diirada si aad u tijaabisid badeecooyin cusub iyo adeegyada oo ka raadi kooxyada diirada bulshooyinka isu imaanayo ee kala duwan.

## ka qeybqaadashada

- fududee ka qeybgal dheeraad ah ee shabakadaha shaqaalaha iyo ururada
- hubi in dhammaan shaqaalaha garanayaan xaquuqahooda:
  - Sii warbixin ku saabsan xaquuqaha shaqaalaha ee buug-yarayaasha hordhaca, kulamada shaqaalaha gudaha iyo intarneetka.

- ku taageer shaqaalaha inay ka qeybgalaan munasabadaha dhaqanka, bulshada, rayidka iyo qoyska.
  - ku dhiirogeli ama u dabaaldag ka qeybgelinada dhaqanka, bulshada ama rayidka ee xafiiska. Tan ayaa noqon karto qaabka munasabadaha shaaha subixii ama galabkii.
  - Ku dhiirogeli shaqaalaha inay qaataan waqti fasax ah si ay uga qeybgalaan munasabadaha qoyska iyo dhaqanka iyo dabaaldagyada bulshada
- sare u qaad shaqada muhaajariinta ganacsiga – oo lagu caawinayo diyaarinta qorista CV-ga, xirfadaha wareysiga, waaya aragnimada shaqada NZ iyo shaqo waxtar leh oo leh dabagalka la talinta
- sare u qaad shaqada dhalinyarada ganacsiga – oo lagu caawinayo diyaarinta qorista CV-ga, xirfadaha wareysiga, tababarka khuseeyo, gelitaanka lagu helayo shatiga darawalnimada iyo shaqo waxtar leh oo wadata dabagalka la talinta
- sare u qaad shaqada dadka curyaanka ah ganacsiga – oo lagu caawinayo diyaarinta qorista CV-ga, xirfadaha intarfiyuuga, iyo shaqo waxtar leh, oo leh dabagalka la talinta
- hirgeli barnaamij sida Chamber Drive – kaas oo taageero 5000 shaqsiyaad inay helaan shatigooda darawalnimada. Qof leh shatiga darawalnimada ayaa todoba jeer uga dhow, ka aan haysan, shaqo helo
- hirgeli barnaamijyada la talinta ganacsiga si loo taageero tirada koreyso ee dadka rabo inay bilaabaan ganacsigooda gaarka ah.
- sii boggag qarash yar ama aan laheyn qarashka xayeysiinta ee milkiilayaasha ganacsiga si ay sare ugu qaadaan fursadaha shaqada ee ka midka ah bulshooyinka ganacsiga kale iyo shabakadahooda warbaahinta bulshada
- u sii munasabadaha qof ahaanta, onleenka oo la heli karo iyo howlaha ganacsiyada looga qeybgelinayo iyo shabakada midba midka kale iyo bulshooyinkooda.

Te Korowai Whetū
Social Cohesion